WASHINGTON STATE COMBINED APPLICATION PROGRAM (WASHCAP)

Codsi

Application

WASHCAP waa barnaamij caawimaad cunto oo loogu talo galay qofka:

- Dakhliga Damaannada Dheeriga ah (SSI).
- Lakulma ama buuxiya Qeexitaanka Dammaanada ee nidaamka nolosha “A”
- Ay yihiin kuwo da'adoodu tahay sideed iyo tobban sanno ama kaweyn.
- Aan haysan wax kasbasho dakhli ah.
- Ku nool nidaamka nolosha lakulmaya dhammaan shuruudaha hoos ku qoran:
  - Aan kunoolayn goob waxbarasho;
  - Nool keligiisa, ama lanool dad kale laakiin asaga soo iibsada cunto kadibna u karsada si dadka kale kabaxsan;
  - Aan guursan ama guursaday laakiin aan hadda lanoolayn xaaskiisa.
- Haddii ay da'adu tahay 18 illaa 21 kadibna buuxiyo ama lakulmo shuruudaha hoos kuqoran:
  - Aan lanoolayn waalidiintoo(da) midkaas oo hella Cuntada Aasaasiga ah; ama
  - Lanool waalidiintoo(da) midkaas oo aan helin Cuntada Aasaasiga ah una soo iibsada cuntada si ayaga gooni ka ah.
- Ayagu aan lanoolayn caruurtooda kayar da'ada 22.

Wixii macluumaad dheeri ah ee ku saabsan barnaamijkan ka eeg cutubka 388-492 WAC oo uu ku jiro WAC 388-492-0020 ilaa 388-492-0120.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan WASHCAP, wac telefoonka lacag la'aanta ah 1 (877) 380-5784.

Waxaan caddeynayaa in:

- Aan keli noolahay, ama In aan in baddan iibsado kadibna u samaysto cuntadayda si gooni ah oo kagooni ah dadka kale ee kunool gurigayga.
  Aniga waxaan bixiyaa $_____ oo kirada loogu talo galay / ammaahda ama guriga bil kasta.
  QAYBTEYDA

Sixiixida aan sixiixo hoos, Anigu waxaan qirayaa in:

- Aniga la ii sheegay waxa ay WASHCAP tahay.
- Anigu waanfahmayaa xuquuqahayga WASHCAP iyo masuuliyadaha.
- Anigu waanfahmayaa in Aan kaheli doono faa'idooyinka cuntadayda tooska WASHCAP.

Waxaan hoosta ciqaabta dhaar beeneedka hoos timaada qaanuunada Gobolka Washington kuqirayaa in macluumaada Aan kusheefay codsigaan uu yahay mid run iyo sax ah.

SIXIIXA IYO TAARIIKHDA	QOR MAGACA

CINWAANKA

CINWAANKA DIRITAANKA WARAAQAHA, HADDII UU KA DUWANYAHAY

LAMBARKA TELEFOONKA AASAASIGA AH ((XXX) XXX-XXXX) ☐ TELEFOONKA GACANTA ☐ GURIGA ☐ FARRIIN	LAMBARKA TELEFOONKA FARRIINTA EE LABAAD ((XXX) XXX-XXXX) ☐ TELEFOONKA GACANTA ☐ GURIGA ☐ FARRIIN	LAMBARKA DAMAANADA BULSHADA AMA LAMBARKA AQOONSIGA MACMIILKA

Waxaan u isticmaalnaa macluumaadkan in aan:	**Waxaa laga yaabaa in aan macluumaadkan siino:**
• Ku go'aamino cidda xaqa u leh barnaamijyadeenna. • Ku soo ururinno lacag-bixinnada dheeriga ah. • Ku maareyno barnaamijyadeenna. • Hubino in aan raacno sharciga.	• Hay'adaha gobolka iyo kuwa federaalka oo si rasmi ah u adeegsanaya. • Hay'adaha Sharci Fulinta oo ku dabajira dadka cararaya si ay uga fogaadaan sharciga. • Hay'adaha gaarka loo leeyahay ee soo ururinta si ay u soo ururiyaaan lacag-bixinnada dheeriga ah ee gargaarka cuntada.

Diiwaangelinta Cod-bixiyaha

Waaxdu waxaa ay bixisaa adeegyada diiwaangelinta codbixiyaha, oo ay ku jiraan diiwaangelinta codbixiyaha ee otomaatiga ah. **Codsashada isku diiwaangelinta ama diidista isku diiwaangelinta in la codeeyo ma saameyn doonto adeegyada ama xaddiga dheefaha ee aad ka heli karto hay'addan.** Haddii aad jeceshahay caawimaad laguugu caawiyo buuxinta foomka diiwaangelinta codeeyaha, waan kugu caawin doonaa. Go'aanka ah haddii la raadinayo ama la aqbalayo caawimaada waa mid adiga kugu xiran. Waxaad awoodaa in aad u buuxisid foomka diiwaan gelinta qofka codeeya si gaar ama khaas ah. Haddii aad aaminsan tahay in qof uu soo farogeliyay xaqa aad u leedahay in aad isku diiwaangeliso ama diido in aad isku diiwaangeliso in aad codeyso, xaqa aad u leedahay asturnaanta ee go'aansashada haddii aad isku diiwaangelinayso ama codsaneyso in aad isku diiwaangeliso codeynta, ama xaqa aad u leedahay in aad doorato xisbigaaga siyaasadeed ee gaarka ah ama dookhaaga siyaasadeed, waxaad cabasho u soo gudbin kartaa: Washington State Elections Office PO Box 40229, Olympia, WA 98504-0229 (1-800-448-4881).

Diiwaangelinta Cod-bixiyaha (sii socota)

Ma doonaysaa in aad isku diiwaangelisid si aad u codeysid ama u cusboonaysiisid diiwaangelintaada qofka codeeya? ☐ Haa ☐ Maya

Haddii aadan saarin ama dooran sanduuqyada midkoodna, waxaa laguu tixgelinayaa in aad go'aan ku gaartay in aadan isku diiwaangelin in aad codeysid waqtigaan, haddii aad u qalanto, oo aadan diiddin, diiwaangelinta cod-bixiyaha otomaatiga ah**.**

Haddii aad calaamadeysan "Maya" ee kore mooyaane, waxaad xaq u yeelan kartaa diiwaangelinta cod-bixiyaha otomaatika ah. Waxaad xaq u leedahay diiwaangelinta cod-bixiyaha otomaatika ah haddii aad jiri doonto ugu yaraan 18 sano jir doorashada xigta, aad tahay muwaadin u dhashay dalka Mareykanka, oo DSHS ay hayso magacaaga, cinwaankaaga degaanka iyo boostada, taariikhdaada dhalashada, xaqiijinta macluumaadka muwaadinnimada, iyo saxiixaaga oo caddeynaya in uu run yahay macluumaadka lagu bixiyay codsigan.

Ma doonaysaa in si otomaatik ah laguu diiwaangeliyo si aad u codeyso? ☐ Haa ☐ Maya

Haddii aad calaamadeysay sanduuqa "Haa," ama aadan calaamadeyn sanduuqyada midkoodna oo aadna ka soo baxdo shuruudaha xaq-u-yeelashada diiwaangelinta cod-bixiyaha, DSHS waxaa ay macluumaadkaaga u diri doontaa Xafiiska Wasaaradda Arrimaha Dibadda ka-dibna si otomaatik ah ayaa laguu diiwaangelinayaa si aad u codeyso.

Digniinta Ciqaabta ee Barnaamijka Gargaarka Cuntada

Waxaan ka xaqiijinnaa hay'adaha kale in uu macluumaadkaaga uu sax yahay. Haddii macluumaadka uu wax ka khaldan yahay, shakhsiyaadka codsanaya waxaa laga yaabaa in aysan helin Gargaarka Cuntada.

Xubin kastoo si ula-kac ah u jebisa mid ka mid ah xeerarkan waxaa:

- Lagu soo oogi karaa dembi iyada oo la raacayo shuruucda Gobolka iyo kuwa federaalka.
- Laga joojin karaa SNAP muddo hal sano ah ilaa si joogto ah.
- Lagu ganaaxi karaa ila $250,000.
- Lagu xukumi karaa xabsi gaaraya ilaa 20 sano.
- Laga joojin karaa SNAP 18 bilood oo dheeraad ah haddii ay maxkamaddu amarto.

Haddii maxkamad ay dembiga kugu hesho:

Qaadashada dheefaha macaamilka ku lugta leh:	**Waxaa laga yaabaa:**
• Iibka maado la kontaroolo	In aadan xaq-u-yeelan muddo laba sano ah ilaa si joogto ah.
• IIbka hub, rasaas, ama waxyaabo qarxa	Si joogto ah ayaa lagaaga joojin doonaa.
• Ka ganacsiga dheefo ka badan $500 oo isku jir ah	Si joogto ah ayaa lagaaga joojin doona.
• Khiyaanno aqoonsi ama degganaansho	Muddo 10 sano ah ayaa lagaa joojin doonaa.

Xuquuqaha Madaniga iyo Bayaanka Takoor La'aanta

Iyada oo la raacayo sharciga xuquuqaha madaniga ah ee federaalka iyo xeer-nidaamyada iyo siyaasadaha xuquuqaha madaniga ah ee USDA, USDA, hay'adaha hoos yimaada, xafiisyadeeda, shaqaalaheeda, iyo hay'adaha ka qaybqaata ama maamula barnaamijyada USDA waxaa laga mamnuucay takoorka ku saleysan isirka, midabka, asal ahaan qaranka uu qofku ka soo jeedo, diinta, jinsiga, naafonimo, da'da, xaaladda guurka, xaaladda qoyska/waalidka, dakhliga laga helay barnaamijka gargaarka dadweynaha, aaminsanaanta siyaasadeed, ama aargudashada ama ciqaabta ka dhalata ka qaybgal hore oo la xiriira xuquuqda madaniga ah, barnaamij ama waxqabad kasta ee uu qabto ama maalgeliyo USDA (inkasta oo dhammaan sababaha kor ku xusan aysan si siman u khusayn barnaamij kasta). Xalka iyo muddada kama dambaysta ah ee cabashada la gudbin karo ayaa ku kala duwan barnaamij ama dhacdo kasta.

Shakhsiyaadka naafada ah ee u baahan habab war-isgaarsiineed kale oo loogu talagalay macluumaadka barnaamijka (t.a., Farta Indhoolayaasha ee Braille, daabacad waaweyn, cajalad cod ah, Luuqadda Dhegoolayaasha ee Mareykanka, iwm.) waa in ay la soo xiriiraan gobolka ama hay'ad degaanka ah ee maamusha barnaamijka ama hakala xiriirto USDA Adeegga War-lalinta Isgaarsiinta lambarkan 711 (cod iyo TTY). Intaa waxaa dheer, in macluumaadka barnaamijka lagu heli karo luuqado kale oo aan Af-Ingiriis ahayn.

Si aad u soo gudbiso cabashada takoorka barnaamijka, buuxi Foomka Cabashada Taloorka ee Barnaamijka USDA, AD-3027, laga helo barta internetka ee Sida Loo Soo Gudbiyo Cabashada Takoorka Barnaamijka iyo xafiis USDA kasta ama qor waraaq ku socota USDA ka-dibna waraaqda ku qor dhammaan macluumaadka lagu codsadey foomka. Si aad u codsato nuqulka foomka cabashada, wac (866) 632-9992. U gudbi foomkaaga la buuxiyay ama warqadda ku socota USDA:

1. **Boostada ugu dir**: USDA Food and Nutrition Service, 1320 Braddock Place, Room 334 Alexandria, VA 22314; ama
2. **Email ugu dir**: FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov.

Macluumaad kastoo kale ee la tacaalaysa arrimaha Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP), shakhsiyaadka waa in ay midkood kala xiriiraan Lambarka Tooska ah ee USDA SNAP (800) 221-5689, kaas oo sidoo kale ku baxa Af-Isbaanish ama wac Lambarrada Macluumaadka Gobolka/Khadka Tooska ah (dhagsii linkiga liiska lambarrada khadka tooska ah ee Gobolka); oo laga helo barta internetka: Khadka Tooska ah ee SNAP.

Bayaanka Aan Takoorka Ahayn
Si aad u soo gudbiso cabashada takoor loo geystay adiga naftaada ama qof kale oo ku saabsan barnaamij helaya gargaar maaliyadeed oo federaalka ka imaanaya oo la soo marsiinaya HHS, foomka ka buuxi barta internetka iyada oo loo marayo barta Cabashada OCR ee ah https://ocrportal.hhs.gov/ocr/. Waxaad sidoo kale OCR kala xiriiri kartaa cinwaankan boostada: Centralized Case Management Operations, U.S. Department of Health and Human Services, 200 Independence Avenue, S.W., Room 509F HHH Bldg., Washington, D.C. 20201; fakis: (202) 619-3818; ama emailka: OCRmail@hhs.gov. Si hawsha loo dedejiyo, waxaan kugu dhiirrigelinaynaa in aad isticmaasho mareegtada barta internetka ee OCR si aad u soo gudbiso cabashooyinka, halkii aad warqad ahaan ku soo gudbin lahayd. Shakhsiyaadka u baahan gargaarka buuxinta cabashada xuquuqaha madaniga ah ayaa email OCR ugu diri kara OCRMail@hhs.gov ama ka wac telefoonka lacag la'aanta ah ee OCR 1-800-368-1019, TDD 1-800-537-7697. Shakhsiyaadka dhagoola ah, maqalka ku adag yahay, ama hadalka ku adag yahay, fadlan garaaca 7-1-1 si aad u heshaan adeegyada war-lalinta ee isgaarsiinta. Waxaan sidoo kale bixinaa qaabab ale (sida farta indhoolayaasha ee Braille iyo daabacad waaweyn), qalabka kaaba naafada iyo adeegyada gargaarka luuqadda oo lacag la'aan ah oo loogu talagalay soo gudbinta cabashada. Hay'adan waxay bixisaa fursad loo siman yahay.